# Waa geesinnimo in aan kula jirno – hadafyada xisbiga SDP ee 2030

## Doorashooyinku waa xulasho

Doorashooyinku waa xulasho. Waa kala xulashada qiyamyo kala duwan. Xulashooyin saameynaya nololmaalmeedka dhammaanteen iyo mustaqbalka Finland.

Doorashadii baarlamaanka ee sannadkii 2019 waxaan annagoo ah sooshal dimuqraadi ku codsannay wakiilashada billaabista isbeddel. Farriinta SDP waxay ahayd haddana tahay: qof kasta wuxuu xaq u leeyahay, in uu sugo in berri ay maanta ka fiicnaato. Isbeddelkan waan billownay waxaanna doorashadan ku codsanaynaa kalsoonida afar sano oo cusub.

Cunug kasta wuxuu hadda xaq u leeyahay barbaarin-horaad iyo billow loo simanyahay. Da'yar kasta wuxuu xaq u leeyahay ugu yaraan waxbarashada heerka labaad. Boosaska billaabista tacliinta waa loo kordhiyay qaab ah, in dad intii hore ka badan ay heystaan fursad ay wax ku bartaan illaa iyo inta ay doonayaan.

Qof kasta oo Finnish ah wuxuu xaq u leeyahay adeegyo taageeraya shqadiisa iyo nololmaalmeedkiisa. Waxaan abuurnay bey'ad waxqabad oo shaqaaloobiddu ay gaartay tiro aad u badan inkastoo cudur safmar ah iyo dagaal ay jiraan. Nolosha shaqadu waa mid sidii hore ka sinnaan badan waalidkuna waxay heystaan shuruudo ay si siman ugu qaybsadaan waalidnimada. Xukuumaddu waxay xoojisay siinaanta nolosha shqada iyo xaaladda shaqaalaha, waxay sidoo kale xoojisay dhaqanka heshiiska.

Qofkasta oo waayeel ah wuxuu xaq u leeyahay in uu qabo kalsooni ah, in uu caawimaad helayo marka uu u baahanyahay. Sidii loo ballanqaaday ayaa loo kordhiyay lacagta hawlgabka ee yar. Dib u habaynta Sote ee adeegyada sooshalka iyo caafimaadka waxaa la gaarsiiyay yoolkii, soonayaasha nololwanaagga ee hadda la abuurayna waxay hawshoodu tahay hirgelinta dammaanadqaadka daryeelka ee todobaad maalmood iyo tayada daryeelka waayeelka.

Qofkasta oo Finnish ah wuxuu fursad u heystay in uu isbeddellada jira ku dhex dareemo ammaan. Xukuumadda Marin waxay dalka u dhaqaajisay dhankaas iyo xubinnimada Nato waxayna dhistay door firfircoon ee caalamiga ah ee Finland. Ilo-dhaqaaleedyada ciidamada difaaca ayaa la xoojiyay soo iibsashada diyaaradaha dagaalkana waxay ku samaysay isfaham ka baxsan xuduudaha xisbiyada. Waxaan hagaajinay sugidda helitaanka waxyaabaha aanay bulshadu ka maarmin, isku-filnaashada tamarta waxaana ka hortagnay xasaradda cimilada innagoo abuurayna dhabbaha lagu gaarayo dhuxul-dhagax la'aanta.

Liiska waxqabadka waxqabad ayaa la sii wadi karaa, laakiin eegmada waa in loo leexiyaa mustaqbalka. Shaqadu weli waa qabyo. Waxbarashada heerka labaad ee lacag la'aanta ah waxay u baahantahay dugsi hoose-dhexe oo xooggan. Nidaamyada nolosha shaqada iyo xuquuqda shaqaaluhu waxay u baahan yihiin xoojin, horumarinta aqoontana waa in la taageeraa in la noolyahay oo dhan. Xasaradaha mustaqbalka waa in laga hortagaa, waa in la abuuro siyaasad korinaysa islamarkaasna xoojinaysaa dhaqaalaha guud. Isku filnaanshaha dadka caadiga ee la xiriirta qiimaha kor u kacaya iyo hubanti la'aanta dhaqaalaha waa la xoojiyaa.

Arrimahaas oo dhan ma dhacaya SDP la'aanteed- Doorashada baarlamaanku waa mid weli ku salaysan xulashooyinka qayimka ah.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa doodda guud hagaya hadal la hubo. Waxaa arrintaas sare u qaadaya xisbiyada midigta iyo kooxda dhaqaalaha ee dabaqadda sare iyo ururada dantooda ilaaliya. Waxay sheegayaan, in aan musiibo ku sii soconno: dhaqaale xumo ay soo socoto sida kaliya ee wax looga qaban karana ay tahay in kaalmada laga jaro la adkeeyo nololwanaagga dadka caadiga ah, lacagta kaalmada nolosha iyo heerka nololeed ee dadkaasna hoos loom dhigo. Inkastoo ay si weyn sare u kaceen qiimaha ascaartu, mushaarka lama kordhin karo ee waa in ammaanka shaqo la'aanta si weyn loo wiiqo. Waxaa kale oo ay ballaqaadayaan, in canshuurta laga

dhimo sharciyadana laga khafiif – shirkadaha waaweyn ee dhaqaalaha badan soo galo. Canshuurtaas la khafiifinayo waxaa lagu maalgelinayaa lacagta adeegyada laga gooyay. Guuleystayaashu waa dadka uu dakhligooda sarreeyo, guul-darraystayaashuna waa dadka caadiga ah ee mushaarka qaata iyo hawlgabka.

Kala sarreynta dakhliga ee kordhaysa, bey'adda kala daadsan iyo feylashada daryeelka caafimaadka ee lagu dhaafiyo jeebka oo buuxa ma ahan waxa kaliya ee la dooran karo ama xeer dabiici ah. Waxa laga hadlayo waa xulashooyin. SDP waxay bixinaysaa xulasho caddaalad ah oo la tijaabiyay iyadoo lagu jiro xasarad, taas oo dhibaatooyinka lagaga jawaabayo, si loo sugo nolosha qofka caadiga ah iyo nololmaalmeed shaqeynaya. Afartii sannadood ee ugu dambeysay waxaan aragnay xasarado waaweyn. Intii lagu jira xasaradahaas waxaan horay u socodsiinnay isbeddello wax lagu dhisayo, waxaan sugnay meheradaha nolosha iyo shirkado, laakiin waxaa isla wakhtigaas daryeelnay dadka.

SDP waxay leedahay qorshe lagu qoray barnaamijkaan doorashada. Waxaan bixin karnaa hoggaamiye waayo-aragnimo u leh hoggaanka isbeddelka waxaana leenahay dhiirannaan aan shaqadan ku sii wadno. Waxaan kaa codsanaynaa in aad doorato. Waxaan kaa codsanaynaa taageeradaada si aan u sii wadno isbeddelka iyo wakiilashadaada afar sano oo cusub.

**SDP – ADIGA AYEEY KULA JIRTAA.**

## ADEEGYO DADKA OO DHAN U SHAQAYNAYA

Ka sooshal dimuquraadiga ahaan, waxaan doonaynaa in aan sugno adeegyada sooshalka iyo caafimaadka, helista daryeelka iyo taageerada loo baahanyahay. Waxaan diyaar u nahay maalgelinta adeegyada iyo dadka adeegyadaas noo qabanaya.

- Waxaan samaynaynaa dib u habaynta ammaanka bulshada oo ku salaysan nooca Ammaanka guud ee SDP.
- Waxaan ku dadaalaynaa in daryeelka caafimaadka la helo todobo maalmood gudohood, mana ku xirna in xanuunka qofka ka hayo jilibka, wadnaha ama maanka.
- Waxaan xaqiijinaynaa, in lacagaha macaamiisha laga qaado aanay qofna ka hor-istaagin daryeelka waxaana ku sii siqaynaa habka lacag la'aan looga dhigayo booqashooyinka xarumaha caafimaadka.
- Waxaan hagaajinaynaa adeegyada daryeelka caafimaadka afka.
- Waxaan ku dadaalaynaa adeegyada dadka waayeelka ah ee shaqaynaya waxaanna sii wadaynaa kordhinta lacagaha hawlgabka ee yar.
- Waxaan sugaynaa cabirka shaqaalaha ku filan daryeelka waayeelka waxaanna kordhinaynaa ilo awoodeedyada xigto-daryeelista.
- Waxaa la abuurayaa istaraatijiyada naafada dalka si loo sugo xuquuqda dadka naafada ah iyo hirgelinta ka qayb ahaanshahooda.
- Waxaan hagaajinaynaa xaaladda dadka kaligood deggan iyadoo aan hagaajinayno lacagta nolosha, iyo iyadoo lagu xisaabtamayo dadka kaligood deggan marka dib u habaynta lagu samaynayo ammaanka bulshada iyo iyadoo laga hortegayo halista ka dhicista nolosha.

## NOLOL SHAQO OO SIDII HORE KA WANAAGSAN

Shaqadu waa tiirka bulshadeenna. Waxaa lagu dul-dhisayaa dakhliga nolosha ee shakhsiga iyo ka qayb ahaanshihiisa, iyo sidoo kale horumarka, awoodda tartanka iyo hodontinnimada bulshada. Fikradda SDP waxay muddo dheer ahayd, in daryeelka shaqaaloobidda iyo abuuranka boosas shaqo oo wanaagsan ay tahay siyaasadda dhaqaalaha ee ugu adkaysiga badan.

- Waxaan xaqiijinaynaa, in xaq uu qof kasta u leeyahay shaqo iyo ka qayb ahaanshuhu uu hirgalo.
- Waxaan u dhaqaaqaynaa heerka shaqaaloobidda oo 80 boqolkiiba ah.
- Waxaan hagaajinaynaa fursadaha ay dadka aanay awooddooda shaqadu buuxin uga qaybqaadanayaan nolosha shaqada.
- Waxaan adkaynaynaa xeerarka nolosha shaqada ee daacadda ah. Waxaan xoojinayaa dhaqanka heshiiska iyo sharciyada suuqa shaqada.
- Waxaan si buuxda uga jawaabaynaa yaraanta shaqaalaha annagoo hagaajinayna xaaladaha shaqada iyo mushaarka islamarkaasna kordhinayna dadka shaqo darteed dalka ugu soo guuraya.
- Waxaan ka hortegeynaa takoorka, waxaan kordhinaynaa nolosha shaqada ee aan xadidnayn, shaqada noloshana waxaa ka dhigaynaa mid qoysaska u wanaagsan.
- Waxaan hagaajinayaa sinnaanta iyo u sinnaanta nolosha shaqada, waxaan kordhinaynaa daah-furnaanshaha mushaarka waxaanna sidoo kale sii wadaynaa horumarinta fasaxyada qoyska.
- Waxaan wax ka qabanaynaa dembiyada suuqa shaqada annagoo dembi ka dhigayna mushaarka hooseeya, xoojinayna doorka wakiilka shaqaalaha islamarkaasna kordhinayna ilo awoodeedka badbaadada shaqada.

## FINLAND OO LAGA DHIGAYO DALKA AQOONTA UGU HORREEYA

SDP waxay doonaysaa in ay dhisto Finland oo ah mid furan, dhiirran oo hindisaad badan. Hadafkeennu wuxuu mustaqbalkana noqonayaa in aan noqono ummadda adduunka ugu aqoonta badan, sababtoo ah taas oo kaliya ayaan ku tartami karnaa dadka oo dhanna ugu xaqiijin kartaa fursad ay ku gaaraan riyooyinkooda.

- Waxaan dugsiga hoose-dhexe ee Finland ka dhigaynaa kan dunida ugu fiican.
- Waxaan kordhinaynaa taageerada gaarka ah ee waxbarashada ee loogu talagalay heer kasta ee waxbarasho.
- Waxaan hiigsanaynaa barbaarin-horaad tayo leh islamarkaasna lacag la'aan ah iyo waxbarasho-horaad labo sano ah.
- Waxaan ku dadaalaynaa helitaan shaqaale ku filan laga soo billaabo barbaarin-horaadka iyo illaa iyo tacliinta sare.
- Waxaan xoogga saareynaa nololwanaagga iyo aqoonta shaqaalaha.
- Waxaan hagaajinayaa dakhliga nolosha ardayda waxaana yaraynaynaa taageerada waxbarashada ee deynta ku salaysan.
- Waxaan sare u qaadaynaa heerka waxbarashada ee dadka Finnishka ah waxaana hadaf ahaan u degsanaynaa, in 2030 ay in ka badan 60 boqolkiiba ay dhallinyaradu noqdaan kuwa tacliin sare leh.
- Waxaan xaqiijinaynaa, in qof kasta uu horumariyo aqoontiisa inta uu nolosha shaqada ku jiro oo dhan waxaana la abuurayaa waxbarashada nolosha shaqada oo dhammaystiran, taas oo barbar-socota waxbarashooyinka shahaadooyinka ku salaysan.

## WAXAAN KU DADAALAYNAA AMMAANKA FINLAND IYO DADKA FINNISHKA AH

Muhiim ayeey annaga noo tahay ku dadaalista ammaanka Finland iyo dadka Finnishka ah. Aasaaska ammaanka waxaa lagu abuurayaa yaraynta sinnaan la'aanta bulshada, xoojinta ka qayb ahaanshaha muwaadiniinta iyo ku dadaalista sugidda keydka waxyaabaha aan laga maarmin iyo awoodda difaaca Finland oo lagu kalsoonaan karo. Waa in ay Finland sidoo kale horumarisaa qaddarinta xuquuqul insaanka, dimuquraadiyadda iyo u hoggaansamidda heshiisyada caalamiga ah ee dunida oo dhan.

- Waxaan ku dadaalaynaa ammaanka guud ee bulshada oo dhan.
- Waxaan sii wadaynaa taageeridda Yukreyn aan ka taageereyno ka hortagga weerarka sharcidarrada iyo arxan darrada ah.
- Waxaan ku dadaalaynaa ilo-awoodeedyada ciidamada qalabka sida iyo awoodda difaaca lagu kalsoonaan karo ee Finland.
- Waxaan Finland u abuureynaa in ay Nato ka qaadato door firfircoon oo horumar leh.
- Waxaan hagaajinaynaa awoodda Finland ay ugu diyaargaroobayso xaaladaha kala duwan ee aan caadiga ah, xittaa xaaladaha aanan weli aqoon in aan sii saadaalinno.
- Waxaan sugaynaa ilo-awoodeedyada booliska iyo hawalaha badbaadada.
- Waxaan ka hortegaynaa xoog-sheegashada dadka isu dhow ka dhexdhacda waxaanna kordhinaynaa tirada boosaska ee guryaha badbaadada
- Waxaan ku dadaalaynaa doorka firfircoon ee Finland ku leedahahy ururada caalamiga ah annagoo taageereyna saadaalinta iyo u diyaargaroobista.
- Waxaan horumarinayaa qaddarinta xuquuqul insaanka, dimuquraadiyadda iyo u hoggaansamidda heshiisyada caalamiga ah ee dunida oo dhan.

## SIYAASAD DHAQAALE OO CADAALAD IYO XILKASNIMO LEH

Mabaa'diida horumarka waara ayaa haga dhammaan siyaasadda SDP. Waa sababtaas, in dhammaan siyaasaddeenu ay noqoto mid waarta, siyaasad dhaqaale oo caddaalad ah, taas oo in si buuxda loo hirgeliyo u baahan adkaysiga bulshada iyo ekoolojiga.

- Waxaan samaynayaa siyaasad dhaqaale oo daacad ah, taas oo ilaalinaysa shuruudaha waxqabad ee dowlad bulshada u wanaagsan iyo bulshada dadkeeda liita.
- Waxaan hiigsanaynaa koritaan dhaqaale ee waara oo boqolkiiba labo ah. Waxaan koboca u abuuraynaa qaab ah, in aan maalgelinno waxbarashada, waxqabadka cilmibaarista, horumarinta iyo ikhtiraaca iyo u wareegista cagaarka.
- Waxaan la taageerayaa koritaanka iyo caalami noqoshada shirkadaha Finnishka ah. Finnishku waa u qalmaan mushaarkooda – waxaa loo wareegayaa habka shaqo-bixiyaha loogu celinayo lacagaha awoodda tartanka.
- Waxaa korontada u samaynaynaa qiimo aan kor loo dhaafi karin waxaana la mideynayaa lacagha ugu badan ee adeegyada.
- Waxaa joojinaynaa deymoobidda ugu dambeyn 2030.

- Waxaan canshuurista ka dhigaynaa mid caddaalad ah, waxaan nikkaxaynaa aasaaska canshuurta waxaana wax ka qabanaynaa canshuur ka baxsashada.
- Waxaan ku dadaalaynaa, in aanay kicin canshuurta dadka mushaarka qaata ee dakhligoodu yaryahay ama dhexdhdexaadka yahay, ganacsatada iyo dadka hawlgabka ah.
- Waxaan lacagaha ka beekhaaminaynaa meelaha lagu shaqeeyo, dib u habaynta waxqabadka iyo wax iibsashada maangalka ah.
- Waxaan qaadaa-dhigaynaa taageerooyinka shirkada waxaana yaraynaynaa taageerooyinka aan waxtarka lahayn ee waxyeellada leh.

## WAXAAN KA HORTEGEYNAA ISBEDDELKA CIMILADA IYO BAA'ADA DEEGAANKA

Hadafka SDP waa horumarinta, in si degdeg ah oo buuxda ekolooji, bulsho iyo dhaqaale ahaanba loogu wareego bulsho waarta oo Midowga Yurub iyo dunida oo dhan ah.

- Waxaan samaynaynaa siyaasadda cimilada oo hanweyn leh.
- Waxaa dadka oo dhan loo sugayaa in ay si caddaalad ah ugu wareegaan nidaamka cagaarka ah.
- Waxaan joojinaynaa wiiqmidda noocyo badnaanta bey'ada waxaana u beddelaynaa dib u soo noolaynta ugu dambeyn dhammaadka tobanka sare.
- Si loo sugo bey'ada Finnishka, waxaa la dejinayaa sharciga bey'ada.
- Waxaa lagu dadaalayaa keymaha Finnishka waxaana sharciga keynta loo cusboonaysiinayaa, in uu sugo habka nuugista kaarboonoksaydhka iyo noocyo badnaanta keymaha iyo weliba isticmaalka xilkaska ah ee keymaha.
- Waxaa la horumarinayaa dhaqaalaha wareegga, waxaa isticmaalidda agabka dib loo isticmaalo ka dhigaynaa mid sidii hore ka faa'iido badan waxaana fududaynaynaa isticmaalidda waarta.
- Waxaan si joogto ah uga go'aynaa tamarta shidaalka Ruushka waxaana u wareegeynaa noocyada tamarta ee aan gurin dikhowna lahayn.
- Waxaan hadaf ahaan u dhiganaynaa in dhanka korontada aan isaga filnaano ugu dambeyn sannadka 2025.